



# Wararkii Ugu Dambeeyey ee Ku Saabsan Xanuunka Caabuqa Coronavirus

Gacaliye Waalidiin iyo Shaqaalaha PPS,

Waxaan rajeyneynaa inaad maqasheen wararka ku saabsan qofkii ugu horeeyey ee la aaminsan yahay inuu qabo xanuunka caabuqa COVID-19 gobolkeena Oregon; iyada oo la sheegay habeenimadii Jimcaha. Qofkani waxaa la aaminsan yahay inuu fayriska ka qaaday waa shaqaale ka tirsan shaqaalaha Iskuul ku yaala Lake Oswego

Waxa aan sii wadi doonaa sidii aan ula socon lahayn xaalada Lake Oswego, iyada oo aan leedahay xiriir joogta ah hay'adaha dawlada iyo hay'adaheena caadfimaadka dadweynaha iskaashigu naga dhaxeeyo oo ay ka mid yihiin Hay'ada Caafimaadka Oregon, Degmada Multnomah iyo Waaxda Waaxda Waxarashada Oregon. Kooxdayada PPS waxa ay sii wadi doonaa sidii ay sameeyaan qorsheyaal laga hortagayo wixii mustaqbalka dhici kara iyo in la helo sida ugu fiican ee loo aqoonsan karo in looga hortago inta aysan waxba dhicin iyo waliba sidii looga falcelin lahaa, haddiiba ay dhacdo in qof ku xidhan Iskuulada PPS qaado fayriska.

***Wararka ugu dambeeya ee coronavirus Degmada Multnomah waxaad ka heli kartaa marka aad tegto dhammaadka fariintani.***

Waxa aanu sidoo kale qaadi doonaa tallaabooyin dhowra oo aan kaga hortageyno si taxadir leh. Shaqaalaha nadaafada iskuul waxa ay diirada saari doona inay kordhiyaan sidii ay u nadiifin lahaayeen si xoog leh korka sare ee meelaha la qabto iridaha marka laga galayo, miisaska, iyo saxanada wax lagu dhaqo, kuwaasi oo qeyb ka ah sidii kor loogu qaadi lahaa nadaafada maalin kasta. Marka ay timaado baahi loo qabo, PPS waxay xiriir la leedahay shirkado bannaanka oo naga caawin kara marka ay jirto in si weyn wax loo nadiifiyo, iyo haddii ay timaado in la arko meelo fayriska laga qaadi karo, waxa aan raaci doonaa habka loo dajiyey in wax loo nadiifiyo ee ay Degmada Multnomah u dajisay in la raaco iyo waliba Xarunta Ka Hortaga Cudurada Faafa. Waxa aan hawlaha wax lagu nadiifinayo sidoo kale la gaarsiinaayaa in la kordhiyo nadaafada basaska iskuulka ee ay ardaydu raacdo.

Ardayda, qoysaska, iyo shaqaalaha waxa ay nagu taageeri karaan habka aan kaga hortageyno iyaga oo si joogta ah gacmahooda u dhacaya, daboolaya marka ay qufacayaan afkooda ama ay hindhisayaan iyo inay isticmaalaan waxyaabaha gacmaha lagu nadiifiyo. Kuwiina isku arka hargab ama ifilo waa in ay guryaha iska joogaan sida ay soo jeediyeen in la raaco tilmaamaha hay'adaha caafimaadka dadweynuhu.

Nabadgelyada, caafimaadka iyo bad-qabka ardaydayada iyo shaqaaluhu waa mudnaantayada ugu sareysa. Waxa ka shaqeyneynaa dhammaan iskuulkada PPS iyo dugsiyada degmada ee aan iskaashiga leenahay sidii aan diyaar ugu noqon lahayn ugu wanaagsan. Waxa aanu qorsheyney in aan idin siino marba wixii cusub si joogta ah ee soo kordha maalmaha soo socda. Inta aad naga heleyso wixii cusub haddii aanu nahay PPS, waxa aad sidoo kale wixii cusub kala socotaa adigoo booqnaya linkiyadani soo socda:

- [Waaxda Caafimaadka Degmada Multnomah](#)

- [Hay'ada Caafimaadka Oregon \(OHA\)](#)
- [Xarumaha Xakaymeynta Cudurada](#)
- [Waaxda Waxbarashada Oregon\(ODE\) Tilmaamaha Isgaarsiinta Cudurada](#)

Waxaan ka warqabnaa warar sheegaya in ardaydeena Eeshiyaanka ah la bartimaameedsay iyaga oo la cunsuriyadeynayo sababta oo ah iyaga oo lala xiriirinayo in raad ku leeyihiin cudurka coronavirus. Tani maaha wax la aqabli karo oo kana soo horjeeda waxyaabaha aan aamisanahay ee sinaanshaha jinsiyadaha iyo cadaalada bulshada. Cabsida laga qabo inuu dilaaco xanuunkani waxa ay kor u qaaday hadalheynta nacaybka iyo dhaqanada todobaadadani markii ugu horeysay ee bukaankii ugu horeeyey coronavirus la arkay. Waa laga maarmaan in la kala saaro ka hortagyada arrimaha caafimaad iyo asalka qofku meesha uu ka soo jeedo iyo dhaqanada cunsuriyada. Haddii aan nahay PPS, waxa aanu qiimeynaa sinaanta jinsiyadaha iyo cadaalada bulshada. Mas'uuliyadayadu waxa weeye in aan arday walba soo dhaweyno, nabadgelyadiisa sugno, iyo iskuuladu noqdaan kuwa ardayda oo dhambi dareemaan inay wada leeyihiin oo ay wax ku baran karaan iyaga oo kor ugu qaadaya aqoontooda ku duugan, iyada oo intaasi ay dheer tahay inaan u dulqaadan hadalada nacaybka leh ama ficilada fuquuqa. Tani waliba waxay muhiim tahay waqtiga ay jirto cabsida ku saabsan fayriska oo si dhib yar u abuuri kara shaki iyada oo aan xaqiiqda la tixgalin. Fadlan waa in aad muujisaa inaad raacdo qiimaha aanu aamisanahay, idinka oo sii wadaya sidii aad ula dhaqmi lahaydeen qof kasta oo ka mid bulshadeena ixtiraam aqoonsanayana sharafta iyo bani'aadamnimada qof kasta.

*Xogtani cusub ee soo soctaa waxa ay ka imaneysaa Degmada Multnomah iyada oo ku saabsan bukaankii ugu horeeyey la aaminsanyahay inuu qabao cudurka coronavirus Oregon. Waxa kale oo ku jira tilmaamo ku saabsan marka adiga iyo/ama ardaygaagu uu joogayo guriga ama uu shaqada ka joogayo, iyo waxa intaas dheer tilmaamo yar oo yareynaya fursadaha aad ku qaadi karto fayriska.*

Oregon waxa ay shaacisay **qofkii ugu horeeyey ee la aaminsan yahay inuu qabo cudurka COVID-19**, bishan Febraayo 28, 2020. Bukaankani waa qof weyn oo mudo joogay iskuulka degmada Lake Oswego iyada oo dhici karto in ay qaadeen arday iyo shaqaalaha iskuulkaasi ahi. Qofkani waxa meel si gaar ah loogu hayaa iyada oo la siinayo wixii gargaar caafimaad ee uu u baahnaa cusbitaalka degmada ka mid ah. Hay'ada Caafimaadka Oregon (OHA) shaqaalahaada cudurada nooluhu waxa ay si dhow ula shaqeynayaa baarayaasha caafimaadka dadweynaha ee Degmada Washington Waaxda Addeegyada Bani'aadamka sidii aad u aqoonsan lahaayeen qof kasta oo xiriir dhow la lahaa qofkani.

Saraakiisha caafimaadku waxa ay taageerayaan iskuulada iyaga oo u diraya guryaha ama guriga wax ugu dhigaya ardayda la dareemo inay ayna fiicneyn caafimaad ahaan iyo shaqaalaha, iyada oo la raacayo [Habracadda saddexda degmo ay dhigteen ee lagu gooni yeelayo](#).

**Waad caawin kartaa naftaad iyo ardayda(daada) si aad u yareyso khatarta sidii aanu u fidin lahayn caabuqa neefashadu, oo ay ka mid yihiin ifilada iyo hargabku, adigoo ku dhiirigalinaya in aad qaado tallaabooyinkani sahalka ah, kuwaasi oo ah sidoo kale sidii looga hortagi lahaa fiditaanka COVID-19:**

- Waa inaad dhaqdaa gacmaahaga inta badan adigoo isticmaalaya biyo diiran iyo saabuun.
- Waa in aad dabooshaa afkaaga adigoo isticmaalaya masar, ama xusulkaaga( maaha gacmahaaga) marka aad qufaceyso ama hindhiseyso, ka dibna aad dhaqdo gacmahaaga.

- Haddii adiga ama qof gurigaagu uu jiran yahay, waa in aad guriga joogtid adiga oo raacaya tallada ay ku siiyaan shaqaalaha daryeelka caafimaadkaagu.
- Waa in aad awoodaada jireed noqotaa mid wanaagsan adigoo cunto fiican cunaya, sidoo kalena seexanaya hurdo kugu filan iyo jimicsi joogta iyo wax ka qabashada xaalada caafimaad ee u baahan in wax laga qabto.

Waqtigani oo ay badan tahay wararka been abuurka ahi, waa inaad wixii warar ah ee dhab ah ka hubisaa halkani [multco.us/covid19](https://multco.us/covid19).